Maalinta Caalamiga ee Bisha Cas iyo Laanqeyrta Cas
8 Maajo 2018

Farriinta Guddoomiyha Ururka Bisha Cas (SRCS)

Maalinta Caalamiga ee Bisha Cas iyo Laanqeyrta Cas, Ururka Bisha Cas wuxu muujinayaa awoodda iyo waxqabadka shaqaalihiisa iyo mutadawiciintiisa isagoo isticmaalaya halkudhega ah "Goob Kasta, Bisha Cas Waa Garabkaaga". Fursadani waxay na siineysaa inaan muujino howlaha Ururka Bisha Cas iyo qeybaha ay bahwadaagta yihiin.

Ururka Bisha Cas wuxu sanad kasta adeegyadiisa gaarsiiyaa in ka badan 3 milyan oo qof isagoo u fidiya adeegyo kala duwan oo ku saleysan baahida ay qabaan. Ururku wuxu xoogga saaraa in uu ka caawiyo dadka sidii ay ugu diyaar garoobi lahaayeen, ugu adkeysan lahaayeen isla markaana uga soo kaban lahaayeen dhibaatooyinka aadaminimo, looga baaqsan lahaa takoorka si looga wada shaqeeyo in la bixiyo adeeg bulsho oo tayo leh, si wanaagsan looga ilaaliyo dhibaatooyinka, la siiyo adeeg caafimaad, lagana yareeyo halista ay musiibooyinku keenaan, loona qaadin lahaa tallaabooyin lagu wanaajinayo xaaladda nololeed. Shaqaalaha iyo mutadawiciinta Ururka Bisha Cas waxa ay lafdhabar u yihiin sidii loo xoojin lahaa awoodda ay leeyihiin dadka.

Munaasabaddan awgeed, Ururka Bisha Cas waxa uu xoojinayaa go'aankiisii ahaa in uu caawiyo dadka nugul isagoo la shaqeynaya bulshada, madaxda iyo dhammaan ciddii kale ee qeyb ka ah arinkan.

Aniga oo ka faa'ideysanaya fursaddaan, in aan halkaan uga mahadceliyo dhammaan shaqaalaha iyo mutadawiciinta Ururka Bisha Cas dadaalkii iyo howshii adkeyd ee ay ku bixiyeen wax u qabashada dadka nugul. Waxaan shaqaalaha iyo mutadawiciinta Ururka Bisha Cas iyo qoysaskoodaba u rajeynayaa in munaasabaddan teeda kale ku gaaraan farxad iyo nabad.

Yusuf Xasan Maxamed
Guddoomiyaha Ururka Bisha Cas (SRCS)